

Xeerka Anshaxaa Shirkadaha/Adeeg-bixiyaha ee World Vision

Wax ka bedelkii ugu dambeeyay - Sebtembar 2022

Nuqulka 3.0

World Vision International (WVI) waxa si aad ah uga go'an inay ilaalsoo heerarka anshaxaa iyo qiyamka ee ugu sarreya dhammaan hawlaheeda wax iibsiga. Xeerkan Anshaxu waxa uu bixinayaa mabaadi' iyo hab-dhaqanno ku saabsan gudashada ganacsigeenna ee maalinlaha ah, kaas oo hubinaya in la raacayo xeerarka wax iibsiga caalamiga ah ee la aqoonsan yahay, iyo anshaxaa iyo hab-dhaqannada ganacsi ee wanaagsan. Si loo xaqijiyo in World Vision / VisionFund, iyo mid kasta oo ka mid ah hay'adahooda la shaqeeya (WV/VF), ay yihiin qaar u hoggaansan deeq-bixiyayaasha, waxaan u hoggaansami doonaa shuruudaha wax soo iibsiga ee deeq-bixiyayaasha, meelaha ay khuseyso. Sidaa darteed, WV/VF waxay ka filaysaa shirkadaheeda, qandaraaslayaasheeda, iyo qandaraaslayaal-hoosaadkeeda la shaqeeya inay saxixaan Xeerka Anshaxaa, iyagoo qiraya aqballida inay u hoggaansami doonaan mabaadi'da halkan ku xusan.

WV/VF waxay ka filaysaa shirkadaha/adeeg-bixiyayaasha la shaqeeya inay:

- 1) Ku dadaalaan inay horumariyan qiimaha lacagta –
 - a) Si firfircooni ugu dadaasho inaad muujiso oo aad wanaajiso natijjooyinka, iyo inaad dhinto kharashaadka inta lagu guda jiro Heshiishka Wadashaqeynta, iyo/ama Amarada libsiga.
 - b) Qiimaha waa inuu si ku habboon oo daacad ah ugu dhigmo shuruudaha iyo khataraha.
- 2) U dhaqmaan si xirfad iyo daacadnimo leh –
 - a) Inaad daacad iyo waaqici ka noqoto kartida iyo awoddha aad leedahay marka aad wax codsanayso.
 - b) World Vision waxa ay ka filaysaa in shirkadaheeda la shaqeeyo ay ku dhiirigeliyan oo ay la shaqeeyaan shirkadahooda/adeeg-bixiyayaashooda la shaqeeya ee u gaarka ah iyo qandaraaslayaal-hoosaadkooda si ay u hubiyaan in ay ku dadaalaan buuxinta mabaadi'da Xeerka Anshaxaa, oo ay awodna u yeeshaan inay muujiyaan tan marka loo baahdo.
 - c) Inay u dhaqmaan qaab taageeraya horumarinta xidhiidh ganacsi oo xirfad iyo anshax ay ku dheehan tahay oo lala yeesho WV/VF.
 - d) Inay muujiyaan go'an cad oo firfircooni leh oo ku aaddan Mas'uuliyadda Bulsho ee Shirkadda.
- 3) Qaataan Mas'uuliyadda –
 - a) Iisticmaal qaab-dhismeedyada qiimaha kuwaaso si toos ah iskugu xidhaya lacag bixinta iyo natijjooyinka, kana turjumaya wadaagista isku dheeli tiranka khatarta waxqabadyada.
 - b) Inaad filato in lagula xissaabtami doono natijjooyinka lama filaanka ah, oo aad qaadato mas'uuliyadda doorkooda, oo ay ku jirto daacadnimada marka ay wax qaldamaan si casharro looga barto.
- 4) Inaad la shaqeeyso WV/VF –
 - a) Inaad diyaar u tahay inaad ka shaqeeyso dhammaan xafiisyada WV/VF, oo ay ku jiraan meelaha jilicsan iyo meelaha ay colaaduhu saameeyeen.
 - b) La wadaagto oo aad u wareejiso hal-abuurnimada iyo aqoonta hababka ugu wanaagsan si loo kordhiyo saameynta guud ee horumarka.
- 5) Inaad ogolaato inaad ka fogaato Iska-horimaad kasta oo Danaha ah — Shirkadda ama Qandaraaslahaa waxay uu xaqiijinayaa inaysan lahayn xiriir, iskaashi ganacsi, ku lug lahaansho, wadashaqeyn, boos, dano dhaqaale, oo aysan ka helin wax hadiyad ah, amaah/deyn ah, ama aysan la gelin wax macaamil ganacsi ah oo kale taas oo u baahan in la sheego sida uu qabo Siyaasadda Iska-horimaadka Dahanee ee World Vision ama VisionFun.
- 6) Inaad dhowrto Heshiisyada Caalamiga ah ee Shaqada iyo sharciyada shaqada ee khuseeya.

7) Inaad leedahay Siyaasad Deegaan oo xooggan –

- a) WV/VF waxay ka rajaansaa shirkadaheeda/adeeg-bixiyayaasheeda la shaqeeya inay yeeshaan siyaasad deegaan oo wax ku ool ah oo ayna u hoggaansamaan sharciyada iyo xeerarka jira si loo ilaaliyo deegaanka.

Xeerka Anshaxa Shirkadaha/Adeeg-bixiyaha ee WV - Bayanka Aqbalidda

Saxiixayga hoose waxa uu xaqiijinaya in aniga/annaga/ ka shirkad ahaan, aan akhrinnay, aan si buuxda u fahamnay oo aan u aqbalayno mabaadi'da Xeerka Anshaxa Shirkadaha/Adeeg-bixiyaha ee World Vision ee kor ku xusan, sida loogu baahdo. Wuxaan fahamsanahay in tallaabo kasta oo aanan waafaqsanayn Xeerkan Anshaxa Shirkadaha/Adeeg-bixiyaha in ay keeni karto joojinta xiriirka ganacsi ee World Vision.

Qor Magaca iyo Darajada Shaqada ee Qofka Matalaya
Shirkadda / Adeeg-bixiyaha

Saxiixa

Magaca Shirkadda / Adeeg-bixiyaha

Taariikhda